Socialförvaltningen Nordost

Göteborgs Stad



# Hagaha qoyska ee Angered

Talooyin ku saabsan waxqabadyada jira iyo taageero

goteborg.se

# Salam!

Adiga qaangaarka ah ama qofka weyn ayna joogaan ilmo agagaarkaaga aad ayaad muhiim ugu tahay. Adiga ayaa ah qofka ilmaha farxad ku abuura madadaaliyana islamarkaasna ku haga noloshiisa. Hagahaan qoyska waxa loogu talagalay in uu kuu fududeeyo adiga ku nool bariga Göteborg si aad u hesho waxqabadyo madadaalo leh iyo adeegyada yaala agagaarka meesha aad ku nooshahay. In waalid la ahado ilmana la lahaado marwalba ma fududa. Maalmaha aanan la dareemaynin inay fududahay, markaas waxaad xaq u leedahay inaad taageero ka hesho bulshada. Waa inaad isticmaasha xuquuqdaas ilamhaaga waanagooda awogiis. Hagahaan waxa uu ku siinayaa tilmaamo ku saabsan halka aad ka heli lahayd taageero haddii adiga ka qof weyn ahaan urabtid, qoyskaaga ama ilmahaaga ama dhallinyaradu u baahan yihiin. Hagaha qoysku waxa uu soo ururiyay in badan oo ka mid ah adeegyada jira, laakiin waxaa jira wax badan oo dheeraad ah oo la dooran karo, agagaarkaaga iyo Göteborg inteeda kale labadaba.

Waxaan rajeynaynaa in hagaha qoysku uu idinka caawiyo adiga iyo qoyskaaga in aad heshaan waxaad raadinaysaan islamarkaasna idin xiiso galiyo si wada jir ah.

# Tusmo


Xaruumaha qoyska ..... 4
Iskuulka xanaanada ee furan ..... 6
Iskuulka xanaanada ..... 8
Dugsiga hoose iyo dhexe ..... 8
Iskuulka dhaqanka ..... 12
Goobaha kulamada ..... 13
Dhulka miyiga, ciyaar iyo dalxiistamashlayn ..... 20
Isboortiga, daryeelka fayow-qabka iyo ururada ..... 22
Talooyin iyo taageero ..... 26
Caafimaadka-iyo daryeelka bukaanka ..... 40
Lambarrada muhiimka ah ..... 43

# Xaruumaha qoyska

Xarumaha qoyska ee Angered waxay leeyihiin rugta umulisada, xarunta daryeelka carruurta (BVC), iskuulka xanaanada ee furan iyo taageere-waalid.

Xarunta qoysku waxaa kaloo ay la shaqaysaa haayada kale oo waxqabadyo kale qabta, sida maktabadaha iyo daryeelka ilkaha. Waxqabadyadu waxay ku siinayaan taageero adiga leh carruur ama noqonaaya waalid. Xarunta qoyska sidoo kale waa goob kulan oo adiga iyo qoyskaagu aad kula kulmi kartaan caruur iyo waalidiin kale. Waxqabadku waxaa loogu talagalay qoysaska leh carruur jirta 0-6 sano, laakiin taageerada waalidka waxaa sidoo kale la siiyaa qoysaska leh carruurta jirta ilaa 12 sano.

Marka aad ka qaybqaadatid kooxaha waalidiinta ee xarunta qoyska, ayaa waxaad heleysaa fursad aad kula kulanto waalidiin kale oo aad wax badan uga barato carruurta iyo waalidnimada.

Waxa laga hadlaaya waxaa kamid ah:

» In la noqdo waalid
» Cunto
» Hurdo
» In laga hortago shilalka
» Xuduudaha
» Xiriirka

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadyada waxaad ka heli kartaa

**goteborg.se/foraldrastodangered**



## Macluumaadka xiriirka

**Xarunta qoyska ee Angered Centrum**
**Cinwaan:** Kultivatorgatan 5
**Rugta umulisada:** 031-747 96 50
**Rugta daryeelka caruurta BVC ee Närhälsan Angered:** 031-747 96 40
**Guriga dhakhtar ee Capio BVC:** 031-722 11 84
**Iskuulka xanaanada ee furan:** 031-365 18 34
**Taageeraha waalidka:** 072-742 85 20, 072-571 86 06, 073-665 20 26
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjecentralangeredcentrum

**Xarunta qoyska ee xaafadda Hjällbo**
**Cinwaan:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Rugta umulisada:** 031-747 96 50
**Rugta daryeelka caruurta BVC ee Närhälsan Hjällbo:** 031-747 83 64
**Iskuulka xanaanada ee furan:** 031-365 28 63
**Taageeraha waalidka:** 076-105 14 80, 072-204 98 61, 073-665 20 85
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjecentralenhjallbo

**Xarunta qoyska ee xaafadda Lövgärdet**
**Cinwaan:** Vaniljgatan 28
**Rugta umulisada:** 031-747 96 50
**Rugta daryeelka caruurta BVC ee Närhälsan Lövgärdet:** 031-747 85 50
**Iskuulka xanaanada ee furan:** 0728-56 59 00
**Taageeraha waalidka:** 072-571 86 06, 072-204 98 61, 073-620 89 31
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjecentralenlovgardet



# Iskuulka xanaanada ee furan

Xanaanada furan waa goob kulan oo ay ku kulmaan kuwa yar iyo kuwa weynba. Carruurta da'doodu tahay 0-6 sano ayaa halkan lagu soo dhaweynayaa si wadajir ah ayaga iyo waalid ama qof kale oo weyn.

Waxaa Angered ka jira dhowr iskuulada xanaanada ee furan ah. Waxaan bixinaa nashaadyo aad adiga iyo ilmahaaga si wadajir ah u kicinaya xiisaha ilmaha iyo rabitaankooda waxbarashada. Halkan waxaad kula kulmi kartaa caruur kale iyo dad waaweyn si ay u wada ciyaaraan, wax u wada abuuraan, iskula heesaan ama waqtigooda ku qaata oo kaliya. Waxaan ku siinaynaa talooyin iyo taageero ee waalidnimadaada ah waxaana la shaqaynaa BVC iyo la-taliyayaasha waalidka, si loo bixiyo adeeg ballaadhan iyo taageero si fudud loo heli karo.

Adiga oo ah qofka waynka ah ayaa mas'uul ka ah ilmahaaga waxaana aad ka qaybqaadanaysaan hawlaha si wadajir ah.

Iskuulka xanaanada ee furan waa bilaash. Waxaad iman kartaa wakhti kasta oo aad doonto saacadaha uu furanyahay ee uma baahnid inaad hore isu diwaangeliso. Saacadaha furitaanka, hoos ka eeg macluumaadka xiriirka ee iskuul kasta oo iskuulada xanaanada ee furan ah.

**Angereds centrum**
**Cinwaan:** Kultivatorgatan 5
**Talefan:** 031-365 18 34
**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolanangered

**Bergum/Gunnilse**
**Cinwaan:** Fanjunkarens Lycka 3
**Taleefan:** 031-367 66 89
**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolanbergumgunnilse
oppnaforskolan.gunnilsebergum


**Gårdsten**
**Cinwaan:** Muskotgatan 47
**Taleefan:** 070-612 32 68
**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolangardsten
oppnaforskolangardsten

**Hammarkullen**
**Cinwaan:** Bredfjällsgatan 46
**Taleefan:** 031-365 26 57

**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolanhammarkullen

**Hjällbo**
**Cinwaan:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Taleefan:** 031-365 28 63
**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolanhjallbo

**Lövgärdet**
**Cinwaan:** Vaniljgatan 28
**Taleefan:** 072-856 59 00
**Bogga internetka:** goteborg.se/oppnaforskolanlovgardet



## Iskuula xanaanada ee furan oo jihooyin gaar ah

**Qoysaska qaano-roobaadka ah**
Iskuulada xanaanada furan ee magaalada waxaa jira waqtiyo u gaaar ah qoyasaska qaanso-roobaadka ah. Qoysaska qaanso-roobaadka waxaa qoysas kasta oo qof kamid ahi xubin ka yahay hbtq.

**Kasii akhri bogogga**: goteborg.se/oppnaforskolandraken och goteborg.se/familjecentralensannegarden

**Waalidiinta da'da yar**
Göteborg stadsmission waxa uu soo dhoweynayaa adiga da'daada ay ka yartahay 23 sano, sugaayana ilmo ama horay u leh ilmo. Halkaan waxaa lagugusoo bandhigayaa goob kulan, halkaasoo adiga iyo ilmahaaga kula kulmi kartaan waalidiin kale oo da'yar ah iyo ilmahooda.

**Taleefan:** 031-755 36 55, 0722-23 67 26

**Cinwaan:** Drottninggatan 33
**Bogga internetka:** stadsmissionen.org

**Ilmaha leh baahida gaarka ah oo kala duwan**
Iskuulka xanaanada furan ee Bräcke Diakoni ee loo yaqaan Tillit waxa uu ku yaala goobo badan ee magaalada. Kooxda carruurta ee ku kulanta way yaryihiin, lookalka iyo qalabka lagu ciyaarana waa kuwa habeysan ,waxqabadkana wuxuu leeyahay shuruudo nadaafadeed oo sarreysa. Shaqaalaha ka shaqeeya Tillit waxay leeyihiin awoodo xirfadeed oo kala duwan iyo khibrado oo ay kamid yihiin  baxnaaninta iyo wadahadalka taageerada.

**Bogga internetka:** brackediakoni.se/tilliten

## Dhaqdhaqaaqyada ilmaha looga talogalay ee kaniisadaha iswiidhan

Qof walba waa lagu soo dhaweynayaa hawlaha kaniisadda ee loogu talogalay carruurta iyo qoysaska. Ka fiirso bogaggooda  waxa ka socda, wakhtiyada iyo ciwaanada.

**Angered iyo Bergum:** svenskakyrkan.se/angered/barn-och-unga-i-angereds-och-bergums-kyrkor

# Iskuulka xanaanada

Dhammaan carruurta waxay xaq u leeyihiin inay aadaan iskuulka xanaanada. Iskuulka xanaanada waxaa loogu talagalay carruurta laga bilaabo hal sano iyo ilaa inta ay ka bilaabayaan fasalka barbaarinta.

Iskuulka xanaanada wuxuu aasaas u yahay waxbarashada ubadka waxayna ka caawiyaan ubadkaagu inuu bilow wanaagsan u helo nolosha. Halkaan waxa laga shaqeeya waxaa kamid ah luuqadda, xisaabta iyo wax abuurista. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Iskuulka xanaanada iyo sida loo codsado, waxaad la xiriiri kartaa adeegga iskuulada xanaanada. Waxay kaloo bixiyaan macluumaad ku saabsan ”daryeelka habeenkii” oo khuseysa adiga u baahan xanaano carruur inta lagu jiro saacadaha shaqada ee aan caadiga ahayn iyo guri-xanaano-maalmeedka, taas oo beddel u ah iskuulka xanaanada.

## La xariir adeegga iskuulada xanaanada

Haddii aad haysid su'aalo ku saabsan iskuulka xanaanada, daryeelka waxbarashada iyo taageerada gudaha xanaanada , la xiriir adeegga iskuulada xanaanada oo ku siin kara macluumaadka ku saabsan boosaska iskuulada xanaanada, foomamka iyo adeegyada elektaroonigga ah.

**Taleefan:** 031-365 09 60
**E-mail:** forskoleservice@forskola.goteborg.se
**Bogga internetka:** goteborg.se/forskola



# Dugsiga hoose iyo dhexe

Iskuulka, ilmahaagu waa inuu helaa fursad uu ku horumaro oo uu helo hab wax cusub uu ku barto oo kuna dareemayo wanaag. Shaqaalaha iskuulku waxay la shaqaynayaan adiga oo ah qofka weyn si aad adinka oo wadajir ah u caawisaan ilmahaaga si uu u horumaro una gaaro yoolalka iskuulka.

Iskuulku wuxuu leeyahay fasalka barbaarinta (sanad dugsiyadeedka 0) iyo dugsiga hoose iyo dhexe sanad dugsiyeedyada 1-9. Dugsiga ka hor iyo ka bacdi waxaa jira xarumo firaaqo oo loogu talagalay carruurta da'doodu u dhaxayso 6 iyo 12 sano.

## Taageero iskuulka dhexdiisa ah

Iskuul kasta, waxaa uu leeyahay kooxda caafimaadka ardayda oo ka shaqeeya in ay taageeraan dhammaan ardayda si ay u gaaraan yoolalka waxbarashada. Kooxda caafimaadka ardayga ee iskuulku waxaa ay bixiyaan taageerada caafimaadka jidhka iyo maskaxda iyo sidoo kale taageero waxbarasheed oo dheeraad ah. Kooxda waxaa ka mid ah kalkaalisada iskuulka, la-taliyaha ardayda ee iskuulka, bare gaar ah, maamulaha, cilmi-nafsi yaqaanka iskuulka iyo dhakhtarka iskuulka. Kooxda caafimaadka ardaydu waxay u joogaan ardayda, laakiin adiga oo ah mas'uulka ilmaha ayaa haysata fursad aad halkaas u doonan karto talooyin iyo taageero ku saabsan ilmahaaga.

## Dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah

Dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waxaa dhigta arday qabta naafo-maskaxeed oo u baahan waxbarasho iskuul oo la waafajiyay baahidooda. Haddaba waxbaridda dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waxa uu ku dhisanyahay iyadoo loo eegayo awoodaha iyo baahiyaha ardayda. Hadafka dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waa waafajisanyahay ardayda, laakiin waa in ay u dhigmaan yoolalka dugsiga hoose iyo dhexe intii suurtagal ah.


## Dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah

Dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waxaa dhigta arday qabta naafo-maskaxeed oo u baahan waxbarasho iskuul oo la waafajiyay baahidooda. Haddaba waxbaridda dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waxa uu ku dhisanyahay iyadoo loo eegayo awoodaha iyo baahiyaha ardayda. Hadafka dugsiga hoose iyo dhexe ee gaarka ah waa waafajisanyahay ardayda, laakiin waa in ay u dhigmaan yoolalka dugsiga hoose iyo dhexe intii suurtagal ah.

## Doorashada iskuulka

Mas'uul ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad codsatid iskuulka uu ilmahaagu aadayo, laakiin laguuma damaanad qaadi karo inaad boos ka heleysid iskuulka aad doorbidaysid. Waxay ku xirantahay inta qof ee codsatay dugsigaas gaarka ah. Tirada carruurta bilawda iskuulada xanaanada way is bedbedeshaa sannadba sannadka ka dambeeya, taas oo sidoo kale saamaynaysa gelitaanka iskuulada kala duwan. Haddii ay jiraan codsadeyaal ka badan inta boosaska la heli karo, magaalada Göteborg waxay leedahay nidaam cidda marka hore heli doonta booska. Tusaale ahaan, carruurta ay walaalahood dhigtaan isla iskuulka iyo carruurta degan iskuulka aktiisa ayaa mudnaanta leh. Carruurtu waxay ku sii wataan fasalka 1aad isla iskuulkii ay ka dhiganaayeen fasalka barbaarinta.

## Macluumaadka xariirka ee Maamulka dugsiga hoose iyo dhexe

Halkan waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad iyo foomamka  si looga codsado boos xaruunta firaaqada ee ilmaha lagusii madadaaliyo.

**Taleefan:** 031-365 09 60 Waqtiga taleefanka: Isniin-Jimce at 8–16.30
**E-mail:** grundskola@grundskola.goteborg.se
**Bogga internetka:** goteborg.se/grundskola

## Laylis-ka-caawin

Iskuuladu inta badan waxay siiyaan ardaydooda caawimo layliska ah. Waxa kale oo jira ururo dhawr ah oo bixiya caawimo layliska ah, carruurta iyo dadka waaweyn intaba, tusaale ahaan waxay ku bixiyaan maktabadaha. Waxaad gashaa kalendarium.goteborg.se oo raadi läxhjälp si aad u heshid wakhtiyada markaas jira.



# Iskuulka dhaqanka

Iskuulka dhaqanka waxaa loogu talagalay adiga oo da'daadu u dhaxayso 6 ilaa 19 jir, wuxuuna bixiyaa maadooyin iyo koorsooyin badan oo kala duwan. Halkan waxaad u iman kartaa inaad heesto, qoob ka ciyaarto, ka shaqeyso filimaan, muuqaal, dhoobo, madadaalo, masrax ku ciyaarid ama ku ciyaarto qalab muusik ah iyo wax kaloo badan.

Xiisaduhu waxay baxaan saacadaha iskuulka ka dib oo waxaad u baahan tahay inaad codsi soo samayso si aad uga qaybgasho koorsooyinka. Meelaha qaar waxa kale oo jira hawlo furan oo aan u baahnayn diiwaangelin.

## Loogu talo galay adiga naafada ah

Waa lagugu soo dhawaynayaa inaad codsato dhammaan koorsooyinka loogu talo galay da'daada. Waanu waafajinaynaa iyadoo aan ku saleynayna xaaladahaaga inta ugu macquulsan. Waxa kale oo jira koorsooyin jiheysan oo la waafajiyay baahiyaha jira. Haddii aad rabto in lagaa caawiyo helitaanka hawsha kugu habboon, adiga iyo qoyskaaga waxaad la xidhiidhi kartaan mid ka mid ah hagayaasha iskuulka dhaqanka kaas oo ku farxi doona inuu ku caawiyo.

Bogga **goteborg.se/kulturskolan** waxa aad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan iskuulka dhaqanka, sida koorsooyinka laga heli karo agagaarkaaga, qarashka ku baxaya, daynsashada qalabka iyo sida aad u codsanaysid.



# Goobaha kulamada

## Maktabad

Maktabadda waxaad adiga iyo ilmahaaga ka heli kartaan:

» amaahanshada buugaagta,buugaagta codka ah iyo filimaan oo luuqada kala duwan ah
» ka qaybgaadashada waqtiyada sheekooyinka iyo masraxyada ilmaha
» amaahanshada ciyaaraha Tv-ga iyo ciyaaraha looxa
» akhrisashada wargeysada
» qabsashada kombuyuutar ama isticmaal mid bannaan

Waxaa jira qad internet oo bilaash oo hoyga dhan kuugu shaqeeynaya si aad sidoo kale ula xiriirsatid kombayutarkaaga.

Macluumaad ku saabsan saacadaha furitaanka iyo barnaamijyada waxaad ka heli kartaa **goteborg.se/bibliotek**. Soo dejiso app-ka ”Biblioteket” si aad buugaag u qabsato ama u aragto waxa ka socda maktabadaha magaalada.

**Maktabadda Angered**
**Cinwaan:** Angereds torg 13
**Taleefan:** 031-365 17 15

**Maktabadda Hjällbo**
**Cinwaan:** Hjällboplatsen 1
**Taleefan:** 031-365 27 80

**Maktabadda Hammarkullen**
**Cinwaan:** Hammarkulletorget 62B
**Taleefan:** 031-365 29 40

**Guriga Suugaamaha Adduunka**
**Cinwaan:** Gamlestads Torg 11

## Xafiiska dadweynaha

Halkaan waxaad ka heli kartaa jawaabaha su’aalahaaga ku saabsan waxqabadyada degmada, tusaale ahaan iskuulada, daryeelka waayeelka ama horumarinta magaalada. Waxaa farxad noo ah inaan dhageysanno fikradihiina iyo aragtidiina oo aan u gudbino mas’uuliyiinta ku shaqada leh iyo siyaasiyiinta magaalada. Waxaan sidoo kale kaa taageeri karnaa inaan kuu sharraxno nuxurka warqadaha iyo go’aamada dowladda ama ku tusno sida loo buuxiyo codsiyada iyo foomamka.

**Taleefan:** 031-365 17 20
**Cinwaan:** Angereds Torg 13
**E-mail:** medborgarkontoret.angered@kom.goteborg.se

### Hawlo dheeraad ah xilliyada fasaxyada iskuulka

Inta lagu jiro fasaxa iskuulada had iyo jeer waxaa jira waxyaabo dheeraad ah oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada Göteborg, maalintii iyo galabtiiba. Si aad u aragto waxa ka socda agagaarkaaga iyo guud ahaan Göteborg, waxaa gashaa jadwalka kaleenderka oo raadi, tusaale ahaan, *jullov ama sommarlov.*

## Dhaqdhaqaaqyada iyo goobaha kulamada da'yarta

Goobaha xilliyada firaaqada waxaa inta badan loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 10 ilaa 20 jir. Badanaa waxay leeyihiin saacado furan oo gaar ah kooxaha da'aha kala duwan. Ku dhawaad wax walba waa bilaash in laga qaybqaato. Xarunta xilliyada firaaqada, adiga ayaa ku lug leh oo go'aami kara waxaad rabto inaad ku qabato wakhtiga firaaqada. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad bilowdo koox heeso, aaddo habeen filin fiirsasho ah, rinjiyayn ama kaliya fadhiisato oo hadashid.

Fiiri saacadaha ay furan yihiin iyo waxa ka socda goobaha xilliyada firaaqada mareegaha ama baraha bulshada.

### Goobta xilliyada firaaqada ee MiniMix

Waxaa loogu talo galay carruurta iyo dhalinyarada oo ah fasallada 4aad ilaa 6aad. MiniMix waxaad ka heli kartaa caawinta leylisyada, ciyaarista ciyaaraha, roodhi dubitaanka, daawashada filimada, la kulanka asaxaab isku da' ah, la hadlidda shaqaalaha iyo wax kaloo badan.

**Cinwaan:** Hammarkulletorget 62C
**Taleefan:** 072-855 40 93

HammarkullensMiniMix

minimix_hammarkullen


### Goobta xilliyada firaaqada ee Hammarkullen-Mixgården

Waxaa loogu talo galay dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 13 ilaa 20 sano. Halkan waxa yaala tiro nashaadyo ah sida ciyaarista muusikada, qoob ka ciyaarka, ciyaaridda kubbada cagta, ka shaqaynta istuudiyaheena muusikada ee qurxoon ama ka qayb qaadashada nashaadaadka kooxeed ee kediska ah.

**Cinwaan:** Bredfjällsgatan 63
**Taleefan:** 031-365 26 87
**Bogga internetka:** goteborg.se/hammarkullensfritidsgard

mixgarden.fritidsgard

mixgardenhk



**Goobta xilliyada firaaqada ee Bergum**

Goobta xilliyada firaaqada ee Bergum waxay bixisaa nashaadyo oo xilliyada firaaqada ah oo furan oo loogu talagalay dhalinyarada da'doodu tahay 13 ilaa 20 iyo carruurta da'doodu tahay 10 ilaa 12 jir. Goobta xilliyada firaaqada waxay ku taalaa qayb kamid ah dugsiga sare ee Bergum iyo hoolka ciyaaraha. Halkaan waxaad kula kulmi kartaa saaxiibo, waxaad la kulmi kartaa hoggaamiyaasha, waxaad ku ciyaari kartaa ciyaarta teeniska iyo ciyaarta bilyaardiga , daawashada TVga iyo ku qaxwaynta kafateeriyada goobta.

**Cinwaan:** Lerumsvägen 24
**Taleefan:** 070-785 12 51, 070-780 09 02
**Bogga internetka:** goteborg.se/bergumsfritidsgard

Bergumsfritidsgard

bergums_fritidsgard



**GUTS – Goobta kulamada ee gabdhaha**
Waxaa loogu talo galay gabdhaha iyo dadka taranska ah oo da'dooda u dhaxeyso 13 ilaa 20 sano. Halkan waxaan ku leenahay qoob-ka-ciyaarka, kaa caawinta laylisyada iskuulka, kooxaha wada-hadalka iyo dhallinyaradu oo abaabuli karaan habeenno nashaadyo ah ama waxay bilaabi karaan mashruucyo. GUTS waa goob kulan oo ay gabdhaha iyo dadka tarans-ku ay ka helaan fursad ay ku wada dhistaan shabakad bulsho oona is xoojiyaan si shaqsi ahaan iyo koox ahaanba.
Waxaad heli kartaa wadahadal lagu-gu caawinaaya ama waad isku dejin kartaa kuna kulmi kartaa dad kale jawi wanaagsan

**Cinwaan:** Linjespringarens Väg 15 (Lookalka dugsiga sare ee Angereds-gymnasiet)
**Taleefan:** 072-856 73 25

guts.motesplats

guts.motesplats

**Goobta xilliyada firaaqada ee Hjällbo**
Waxaa loogu talo galay dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 13 ilaa 20 sano. Waxqabadyada waqtiyada firaaqada waxay furan yihiin fiidadkii, laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha. Halkan waxaad ku baran kartaa saaxiibo cusub waxaana aad xor u tahay inaad la timaaddo fikrado ku saabsan waxa aan wada qaban karno.

**Cinwaan:** Bergsgårdsgärdet 79
**Taleefan:** 031-365 27 34
**Bogga internetka:** goteborg.se/hjallbofritidsgard

hjallbo.funhouse

hjallbo_fritidsgard

**Goobta xilliyada firaaqada ee Kooperativet Fjället**

Kooperativet Fjället waa goob xilliyada firaaqada ah oo uu maamulo urur oo ku yaala xaafadda Rannebergen oona loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 12 ilaa 20 sano. Adiga oo doonaya in uu ka qaybqaato dhaqdhaqaaqyada, tamashlayn bannaanka iyo wixii la mid ah waxaa bixinaysaa khidmada xubinnimada ka dibna waxaad ka qayb qaadan kartaa hawlaha Fjället.

**Cinwaan:** Fjällblomman 2
**Taleefan:** 031-330 39 36
**Bogga internetka:** fjallet.org

kooperativetfjallet

kooperativetfjallet

## Dhaqdhaqaaqyo loogu talagalay da' kasta iyo waxa xiiseeyaan

Magaalada Göteborg oo ay weheliyaan qaar badan oo ka mid ah ururada magaalada waxay qabanqaabiyaan hawlo badan oo kala duwan oo had iyo jeer bilaash ah ka qaybqaadashadooda. Waa wax walba oo laga bilaabo muxaadarooyin, bingo iyo farsamada gacanta ilaa ciyaaraha iyo dhaqanka. Waxaad gashaa jadwalka kaalenderka magaalada oo raadi adigoo ku saleynaaya waxa xiiseynasid!

**kalendarium.goteborg.se**

**Guri dhaqameedka KulturATOM**

Waxqabadku waa guri dhaqameed oo nool iyo goob kulan oo loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 16 ilaa 20 sano. Halkan waxa kale oo aad ku tababaran kartaa qoob ka ciyaarka ama waxaad ku ciyaari kartaa muusik. Waxa kale oo aad lookaaladeena ku samayn kartaa qabanqaabo kuu gaar ah, adiga oo nagala kaashanaya. Waxaan la shaqaynaa iskuulada dhaqanka ee Angered iyo ururada maxaliga ah.

KulturATOM waxay leedahay hanti lacageed oo gaar ah oo adiga oo dhallinyaro ah aad codsan karto si aad u hirgeliso fikrado wanaagsan

**Cinwaan:** Högaffelsgatan 12, waxay isku guri ku yaalaan Blå stället iyo dugsiga sare ee Angeredsgymnasiet
**Bogga internetka:** goteborg.se/kulturatom

UngdomssatsningenKulturAtom

kulturatom



**Goobta xilliyada firaaqada ee Gårdsten**

Waxaa loogu talo galay dhalinyarada da'dooda u dhaxeyso 13 ilaa 20 sano. Fikradahaaga iyo rabitaankaaga ayaa xukuma waxqabadka. Halkan waxa aad ka heli doontaa istuudiyo muusiko ah, ciyaarta teeniska, qoob ka ciyaarka, playstation, ciyaaraha wadajirka loo ciyaaro, kafateeriyada, qolka filimada iyo meelo fiican oo aad waqti kula qaadan karto saaxiibada iyo shaqaalaha.

**Cinwaan:** Muskotgatan 5
**Taleefan:** 079-065 33 95

fritidgardsten

gardstens_fritidsgard

**Goobta xilliyada firaaqada ee Lövgårdet-Barta dhalinyarada**

Waxaa loogu talo galay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 13 Iyo 18 jir. Halkan waxaad kula kulmi kartaa asaxaabta, ku ciyaari kartaa ciyaaro kana dhegeysan kartaa muusik.

**MiniLövis**

Waxaa loogu talo galay carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 10 ilaa 12 sano. Waxaan haynaa hawlo kala duwan sida farshaxanka, roodhi dubista iyo ka caawinta laylisyada. Waxa kale oo aad halkan u iman kartaa si aad ula kulanto asaxaab kale oo isku da' tihiin, ama la hadashid qof weyn oo shaqaalaha ah.

**Cinwaan:** Vaniljgatan 23
**Taleefan:** 031-365 16 81
**Bogga internetka:** goteborg.se/lovgardetsfritidsgard

LövgärdetsUngdomsgård

lovgardetsfritidsgard

**Dhalinta saamaynta ee Unga påverkar**

Dhalinta Saamaynta ee Unga påverkar waxay ka shaqeysaa kordhinta saameynta carruurta iyo dhalinyarada. Waxay la shaqeeyaan kooxo caruur iyo dhalinyaro ah, waxayna taageeraan sida golaha dhalinyarada, Qofka ka dambeeya labiska isku midka ah iyo dhalinyarada horumarinta magaalooyinka. Waxay sidoo kale kala shaqeeyaan dadka waaweyn hawlaha saameeya dhalinyarada, Angered iyo gudaha magaalada labadaba.

Shaqada waxaa loo qabtaa siyaabo kala duwan, tusaale ahaan iyada oo loo marayo:

» Golaha dhalinyarada Angered iyo lacagta mashruuca golaha dhalinyarad
» Dhalinta horumarisa magaalada ee Angered
» Qofka ka dambeeya labiska isku midka ah
» Safiirada saamaynta dhalinta
» Kulamo-wadahadal iyo shirar dhexmara dhalinta iyo siyaasiyinta/go'aamiyeyaasha
» Shaqooyinka laga shaqeeyo xilliyada fasaxa sida Kaamka Dimoqaraadiyada iyo Kaamka Dhalinta Horumarisa magaalada
» Kaalmayn si loo xaqiijiyo fikradaha carruurta iyo dhalinyarada
» Munaasabado
» Shabakado shaqo
» Is tilmaamid kooxeed

**Cinwaan:** Högaffelsgatan 12, lookaalada KulturATOM's
**Taleefan:** 072-500 62 39, 072-856 51 86
**Bogga internetka:** goteborg.se/ungapaverkar

ungapaverkarangered

# Dhulka miyiga, ciyaar iyo dalxiis-tamashlayn

Angered waxay u dhowdahay dhulka miyiga iyo dabaasha. Waxaa jira kaymo iyo waddooyin-tamashlayn oo wanaagsan, meelo wax lagu dubto iyo meelo bannaan oo lagu ciyaaro laguna qaato waqti miyiga adigoo cunto sii qaadanaaya

Waxaad sidoo kale soo dejisan kartaa app-ka magaalada Göteborg ”Badplatsen Göteborg” si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan meelaha lagu dabaasho!

## Kaydka dhulka miyiga ah ee Vättlefjäll

Mid ka mid ah aagagga dhulka miyiga ah ee ugu weyn Göteborg. Halkan waad ku socon kartaa, baaskiil ku wadi kartaa, waxaad ku duban kartaa hilib shiidan, dabaalan kartaa, oo aad ka guran kartaa miraha iyo boqoshaada. Waxa kale oo jira goob jimicsi oo bannaanka ah iyo wareegyo loogu talagalay orodka. Dhaqdhaqaaqyada carruurta waxaa lagu horumariyaa socodka dhulka, fuulitaanka iyo ka boodidda dhagaxyada.

**Maxaadada ugu dhow:** Kryddnejlikegatan

## Jardiinka ciyaaraha ee Hammarkullen

Qaar ka mid ah garoomada waaweyn ee Göteborg, sida jardiinka ciyaaraha ee Hammarkullen, waxaa ku sugan shaqaale u qabta dhaqdhaqaaqyada carruurta. Waxaa jira jimicsi bannaanka ah, masrax leh fadhi, qalabka wax lagu dubto, miisaska kursiga ah, garoomada cawska macmalka ah, barxadda kubbadda kolayga, kubadda miiska iyo miiska kalaha. Waxa kale oo suurtagal ah in aad soo amaahato alaabta carruurtu ku ciyaarto, gudaha gasho si aad isku kululayso, u akhrisato buugaag, musqul ayaad ka gali kartaa waxaana aad ku kululaysan karto cuntada ilmaha.

**Maxaadada ugu dhow:** Hammarkullen



## Jardiinka magaalada ee Angered

Jardiinka magaalada ee Angered waxay ku taal bartamaha Angered. Wax-ay leedahay hab siirkus ah, labadaba markay noqoto xagga midabka, qaabka iyo qalabka ciyaarta. Jardiinka lagu nasto waxaa ku yaal meelaha wax lagu dubto, garoonka boolada, goobo fadhi, roogag caws oo waaweyn iyo sidoo kale jiim bannanka ah iyo hawlo kale. Waxa kale oo jira qalabka taraaraxa ah, xadhkaha fuulidda, muraayadaha qosolka, joodariyada lagu boodboodo, meelo waawayn oo la fuulo, wiifowyo, leex-leexyada la isku luxo, sanduuqyo ciid ah, guri-ciyaar, hadhiga la raaco iyo wiifowya waaweyn.

**Maxaadada ugu dhow:**
Angered centrum

Waxaad ka heleysaa dhammaan garoomada lagu ciyaaro ee magaalada **goteborg.se/lekplatser**

Halkaa waxaa jira macluumaad dhe-eraad ah oo ku saabsan waxa laga heli karo garoomada ciyaaraha kala duwan, sida loo tago iyo helidda goob kasta. Waxaad sidoo kale soo dejisan kartaa app-ka **”Lekplatsen Göteborg”.**

# Isboortiga, daryeelka fayow-qabka iyo ururada



### Goobaha isboorta ee dhow-cinwa-an hoosaad

Goobaha isboortiga ee dhow waa meelo lagu ciyaaro, isboorti iyo wadajir adiga ku nool agagaarka deegaan-ka. Waxaa loogu talagalay carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Uma baahnid inaad ballan qabsato, wax kharash ah kuma baxayso, xarumahuna mar walba waa furan yihiin.

Waxaa jira 11 garoomo isboorti oo dhow ah oo ku yaal magaalada, halkaas oo laga yaabo inay jiraan, waxyaabo kale, garoonka kubbadda cagta, barxad-da kubbadda kolayga, wadada orodka, god-boodka dheer iyo dhismo fuulka.

Eeg **goteborg.se**, raadi näridrottsplats.

### Goobaha isboortiga dhow ee Ingefäran

Goobta ciyaaraha ee Ingefäran, waxa yaala qalab jimicsi, wiifowga ama lulid-da, meel ciid ah oo ilmaha ku ciyaaraan, qalabka lagasoo taraaraxa, garoon kub-badda kolayga ah iyo garoonka boolada oo leh meelo la fadhiisto. Waxa kale oo jira ciyaar bannaaneed oo leh looxo, buul iyo geedo fuulid.
**Maxaadada ugu dhow:** Saffransgatan, Timjansgatan

## Barkadaha dabaasha

Meelo badan oo ka mid ah barkada-ha dabaasha ee magaalada waxaa jira casharo dabaasha ah oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweynba. Waxa kale oo aad ka qayb qaadan kartaa jimicsiga biyaha iyo koorsada biyo ku dhex ciyaaridda. Angered waxaa ku yaala laba barkadood oo lagu dabaasho. Ha iloobin inaad soo qaadato quful ama ka iibso mid meesha qasnadda.

Si aad u heshid dhammaan barkadaha dabaasha iyo saacadaha ay furan yihiin, ka eeg bogga internetka ee barkadaha dabaasha ama app-ka ”Badplatsen Göteborg”.

### Garoonka ciyaaraha ee Angered arena

Waxaa loogu talo galay adiga ama qofka raba inaad jimicsi-dabaalatid, dabaalatid, kasoo boodid darafyada sare ee dabaasha  ama iskeega nasatid barkadda yar ee dabbaaleed. Waxa kale oo jira minaaradda lagasoo boodo iyo meesha lagasoo boodo ee dabaasha. Ka dib, waxaad ku nasan kartaa qolka la isku kululeeyo. Goobta nasashada waxaad ka heli doontaa noocyo kala duwan oo qololka la isku kululeeyo ah,

barkad dabaasha iyo barkadda biyaha qabow. Gurigu wuxuu kaloo leeyahay jiim, tababar kooxeed, hoolka barafka, barxadda dhaqdhaqaaqqa, hoolka ciyaaraha iyo hoolka ciyaaraha fudud.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 15
**Taleefan:** 031-368 22 90
**Bogga internetka:** goteborg.se/angeredarena

### Dabaasha Hammar ee Hammarbadet

Dabaasha Hammar waa barkad yar oo dabaal ah oo dhawaan dib loo dayactiray oo inta badan loo isticmaalo casharada dabaasha, laakiin sidoo kale waxay u furan tahay dadweynaha waqtiyada qaarkood. Waxa kale oo jira goob jimicsi oo iftiin ah oo qaad weyn leh.

**Cinwaanka:** Hammarkulletorget 63
**Taleefan:** 031-368 22 40
**Bogga internetka:** goteborg.se/hammarbadet

### Garoonka ciyaaraha ee Angered arena

Qaybta fadhiga ee hoolka barafka waxaad ka daawan kartaa tababarada, ciyaarta xeegada barafka ama tartanka ku socodka barafka.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 15
**Taleefan:** 031-368 22 90
**Bogga internetka:** goteborg.se/angeredarena



## Hoolalka barafka

Magaalada waxaa ku yaal goobo baraf oo badan oo aad ku samayn kartid baraf-socod. Meelo badan oo ka mid ah garoommada barafka waxaad ka kiraysan kartaa kabaha barafka iyo koofiyadda difaaca madaxa. Adiga bilowga ah oo barbaratoyda ah waxaa jira noocyo kala duwan oo caawimo ah si aad u barato sida looga socdo barafka. Waqtiyada qaarkood way u furan tahay qof walba. Inta ka hartay waqtiga waxaa isticmaala ururada iyo kooxaha kale ee halkaas ku tababarta. Shakhsiyaadka gaarka ah, ururada iyo shirkaduhu waxay sidoo kale waqti ka kiraysan karaan hoolka barafka.

Ka hel dhammaan goobaha barafka, saacadaha ay furanyihiin iwm. bogga **goteborg.se** raadi ishall.

### Garoonka ciyaaraha ee Angered arena

Qaybta fadhiga ee hoolka barafka waxaad ka daawan kartaa tababarada, ciyaarta xeegada barafka ama tartanka ku socodka barafka.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 15
**Taleefan:** 031-368 22 90
**Bogga internetka:** goteborg.se/angeredarena

## Ijaaro hool isboorti ama lookal xafladeed

Magaalada Göteborg waxaa ku yaalo ku dhawaad 50 hoolal isboorti oo maalin walba loo isticmaalo noocyada kala duwan ee isboortiga, shirarka ama xafladaha. Waxa kale oo jira qolal kale oo shirarka iyo xafladaha oo ay ururada



iyo shakhsiyaadka gaarka ahi u kiraysan karaan hawlo kala duwan.

Ma doonaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hoolalka ciyaaraha ama lookaalada kale iyo in aad hesho wakhtiyada firaaqada yihiin? Waxaad gashaa bogga **goteborg.se** oo raadi idrottsanläggningar ama mötes- och festlokaler.

## Ururada

Waqooyi-bari ee Göteborg waxaa ka jira ururo badan oo leh dhaqdhaqaaqyo dano ama xiise kala duwan leh, sida isboortiga,jimicsiga, dhaqanka, muusiga iyo laylis-ka-caawinta. Inta lagu jiro fasaxa iskuulada, ururo badan ayaa carruurta iyo dhalinyarada u qabanqaabiya waxqabadyo dheeraad ah.

Ma doonaysaa in aad wax badan ka ogaato ururada jira, ma ku fikiraysaa in aad samaysato urur ama codsato deeqaha ururka?

Booqo goteborg.se oo raadi förenings-stöd Nordost ama si toos ah ula xiriir iskuduwaha ururada Waqooyi-bari ee maamulka arrimaha bulshada.

**Taleefan lambar:** 031-365 26 72, 031-365 16 87
**E-mail:** foreningsstod@socialnordost.goteborg.se

## Xaruunta fayow-dhowrka ee Hälsoteket-cinwaan hoosaad

Xaruunta fayow-dhowrka ee Hälsoteket waxay ka shaqeysaa wanaajinta caafimaadka ee carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn. Halkan waxaad waqti ka qabsan kartaa wadahadalada la xariira caafimaadka haddii aad rabto inaad ka hadasho sida adiga ama qoyskaagu aad u hagaajin kartaan caafimaadka. Xaruunta fayow-dhowrka ee Hälsoteket waxay dadka oo dhan u qabataa tababaro fudud oo meelo kala duwan oo deegaanka ah, iyo sidoo kale muxaadarooyin iyo koorsooyin ku saabsan caafimaadka. Dhammaan hawlaha xaruunta fayow-dhowrka ee Hälsoteket waa bilaash. Bogga internetka iyo Facebook-ga, wax badan ayaad ka akhri kartaa oo waxaad arki kartaa waxa socda.

**Cinwaanka:** Högaffelsgatan 10
**Taleefan:** 031-365 11 44
**Bogga internetka:** goteborg.se/halsoteketangered
Hälsoteketangered



# Talooyin iyo taageero

Halkan waxa aad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan waxqabadyada bixiya taageerada qoysaska, waalidiinta iyo carruurta. Dhammaan qoysasku way kala duwan yihiin sidaas darteed waxaa jira noocyo kala duwan oo taageero ah oo la heli karo. Haddii ay kugu adag tahay inaad ogaato meel aad u wax u raadsanaysid, waxaad la xidhiidhi kartaa mid ka mid ah waxqabadyada hoose, oo waxaad heli doontaa caawimaad si aad u hesho meesha aad dooneysid.

## Taageero ku socota waalidiinta

Waalidnimadu waa hawl muhiim ah oo mararka qaarkood adag. Nolol maalmeedku waxay noqon kartaa mid aad u faraxad badan, laakiin sidoo kale caqabadana leh. Ma rabtaa in aad ku horumarto doorkaaga waalidnimo? Ma dareensantahay in ay adag tahay in waalid la noqdo mararka qaarkood? Mise ilmahaagu ma u baahan yahay taageero? Halkan waxaad kahalaysaa macluumaad, talo iyo taageero marka ay noqoto walaacyada yaryar ama kuwa kugu adkaadaba.

### Taageero waalid oo gaar ah

Taageereyaasha-waalidku waxay bixiyaan taageero waalid oo si gaar ah loo waafajiyay dadka deggan degmada. Waxay ku yaalliin dhammaan xarumaha qoyska ee Angered waxayna taageero siiyaan waalidiinta leh carruurta u dhexeysa da'dooda 0 ilaa 12 sano.

**Halkaan waxaad ka heli kartaa caawinaad ah in:**

- ka heshid talo iyo taageero la xariirta doorkaaga waalidnimo
- heshid oo horumarisid meelaha aad ku fiicantahay waalid ahaan
- heshid qalab iyo xeelado cusub waalid ahaan
- ka hadashid xidhiidhka iyo dabeecadaha qoyska
- ka hadashid sida xiriirka dadka waaweyn u saamooba markii caruur la helo yeesho.

Wax walba waa bilaash, qof kasta oo halkan ka shaqeeyana waxaa saaran waajib sir xejin ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadyada waxaad ka heli kartaa.

**Taageerada waalideed oo koox-kooxda ah ee xaruunta qoyska**
Taageereyaasha-waalidka ee xarumaha qoysku waxay sidoo kale bixiyaan taageero waalid oo kooxo-koox ah sida tusaale ahaan Kulanka-amaanqabidda (0-18 bilood) iyo ABC, Dhammaan carruurta ayaa dhexyaal ah, (3-12 sano). Markaad ka qaybgasho kooxaha waalidka, waxaad haysataa fursad aad kula kulanto waalidiinta kale oo aad wax badan uga barato carruurta iyo waalidnimada. Waxay ka hadlaan waxyaabo ay ka mid yihiin sida ay tahay waalidnimada, sida loo sameeyo xuduudaha carruurta iyo muhiimadda cuntada iyo hurdada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hawlaha waxaad ka heli kartaa **goteborg.se/foraldrastodangered**

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa la-taliyayaasha waalidka oo laga heli karo mid ka mid ah xarumaha qoyska.

**Xaruunta qoyska ee Angereds centrum**
**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Taageeraha-waalidka:** 072-742 85 20, 072-571 86 06, 073-665 20 26
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjecentralangeredcentrum



## 1177 hagaha daryeelka

Bogga 1177 waxaa ku jira wax badan oo aad ka heli kartid adiga ah, ama dhawaan ahaan doona waalid. Ciwaank hoosaadka ilmo iyo uur ayaa waxaad ka akhrisan kartaa dhammaan wixii ku saabsan uurka, dhalmada iyo waalidnimada. Waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad sugan iyo talooyin ku saabsan caafimaadka carruurta, korriimadooda, xuquuqdooda, cudurrada iyo daryeelka.

**Qaybta caawinta ee carruurta iyo da'yarta**

Waalidiin badan ayaa u arka in xilliyada qaar ee korriinka ilmaha ay dhib badantahay. Markaa way fiicnaan kartaa inaad hesho qof aad la hadasho. Qaybta caawinta waxaa loogu talagalay adiga waalidka ah oo leh carruur da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 18 sano. Halkan waxaa jooga daryeelayaasha qoysaska oo khibrad dheer u leh la shaqaynta noocyada kala duwan ee taageerada qoysaska. Shaqaaluhu waxay leeyihiin kartiyo xirfadeed oo kala duwan iyo tababaro dheeraad ah oo kala duwan si ay u daboolaan baahiyaha kala duwan. Waxqabadku wuxuu bixiyaa shirarka waalidiinta, si shakhsi ahaan ah iyo koox ahaan labadaba.

Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg **goteborg.se/foraldrastodangered.**

**Taleefan qaybta caawinta carruurta:** 031-365 25 01
**Taleefan qaybta caawinta da'yarta:** 031-365 11 51
**E-mail:** resursenheten.barnochunga@socialnordost.goteborg.se

**Xaruunta qoyska ee Hjällbo**
**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Taageeraha-waalidka:** 076-105 14 80, 072-204 98 61, 073-665 20 85
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjecentralenhjallbo

**Xaruunta qoyska ee Lövgärdet**
**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Taageeraha-waalidka:** 072-571 86 06 072-204 98 61, 073-620 89 31

**Hay'adda badbaabdinta carruurta**

Talooyin iyo dhiirigelin loogu talo galay adiga waalid ahaan.

Bogga internetka: goteborg.se/familjecentralenlovgardet

**Qaybta cilmi-nafsiga ee hooyooyinka-iyo daryeelka caafimaadka ilmaha**

Waxaan u joognaa adiga dareemaya inaad u baahan tahay taageero iyo talo dheeraad ah xagga waalidnimadaada marka lagasoo tago taageerada aad ka hesho rugta umulisada, xarunta daryeelka carruurta iyo xarunta qoyska. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa wixii su'aalo ah oo ku saabsan caafomaadka ee la xidhiidha uurka, dhalmada iyo waalidnimada, tusaale ahaan:

- walaaca ku saabsan noqoshada waalid
- sida uu yahay dareenkaaga caafimaad marka aad noqoneysid waalid
- marka ay dhibaato kaa haysato waalidnimadaada
- hab dhaqanka ubadkaaga iyo horumarkiisa
- dhacdooyinka qoyska ee saameeya adiga iyo ilmahaaga.

Waxaan la kulannaa waalidiinta cusub, carruurta da'dooda u dhaxeyso 0 ilaa 5 jir ah iyo waalidiintooda si gaar ah iyo koox ahaanba.

Waxaan sameynaa qiimeyn ku saabsan horumarka carruurta anagoo waajibaadka ka heleyna daryeelka caafimaadka carruurta. Waxaad marka hore la xiriiri doontaa mid ka mid ah cilmi-nafsi yaqaanada adiga oo u maraya xarunta daryeelka carruurta ama rugta umulisada.

**Waxaad sidoo kale si toos ah noogu soo wici kartaa:** 076-130 63 94. Booqashooyinka waa bilaash.
**Waxaan joognaa:** Angered Torg 15, dabaqa 2aad

### Waxqabadka ku shaqada leh dhallaanka

Waxqabadkaan waxa loogu talagalay waalidiinta cusub iyo adiga leh dhallaan una baahan taageerada doorka waalidnimadaada. Waxqabadyadu waxa ay dhacaan iyada oo lala kaashanayo qaybta cilmi-nafsiga ee daryeelka hooyada iyo dhallaanka ee Göteborg.

**Waxaad imaan kartaa waxqabadka dhallaanka marka:**

- dareemaysid welwel iyo niyad jab ku saabsan waalidnimadaada ama ubadkaaga
- haddii aad rabto inaad ka hadasho waxa dareen adag kugu keenaya ee ah sugidda inaad yeelato carruur
- ay adag tahay in la fahmo waxa u fiican ilmuhu ee u baahan yahay
- aad ka welwelsan tahay sida ilmuhu wax u cuno ama u seexdo
- ay adagtahay Ilmaha in la sasabo
- adinka waalid ahaan xiriirka idinka dhexeeya xumaado.

**Halkaan waxaa la bixiyaa:**

- wadahadal shaqsiyeed adiga iyo qoyskaaga
- taageero si loo abuuro jawi wanaagsan oo isla wada qaadataan ilmahaaga
- kulamada kooxeedyo oo loogu talo galay waalidiinta iyo carruurta.

Waa baahiyadiina waxa dhaxtaalka ah oon hagaaya hawlaha waxqabadka. Adigoo qayb ka ah ayaa la go'aaminayaa sida xiriirka loo qaabeynaaya. Waxqabadka ku shaqada leh dhallaanku waa qayb ka mid ah qaybta caawinta ee carruurta iyo dhalinyarada.

**Taleefan:** 031-365 11 65

### Mareego leh talooyin iyo macluumaad loogu talagalay waalidiinta

Gobolka Västra Götaland waxa uu soo ururiyay warbixinno iyo talooyin ku salaysan cilmi-baadhisyada hadda socda kuwaas oo kaa caawin kara xoojinta waalidnimadaada. Boggooda internetka, waxaad ka heli kartaa tilmaamo ku saabsan sida wada-hadalka wanaagsan uu u ekaan karo, sidaad u siin lahayd ilmahaaga dhiirri-gelin adiga oo aan xanaaqin iyo siyaabo kala duwan oo aad ku taageeri karto ilmahaaga iskuulka.

**Qadka waalidka ee loogu talo galay adiga leh ilmo kuray ah:**

Waalid ahaan ama qof weyn ee ay ka ag dhowyihiin da'yar kuray ah ama qaangaar ah, waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad qof xirfadle ah kala hadasho fikradahaaga iyo welwelkaaga. Qadka waalidka ee qaybta dhalinyarada waxaa loogu talagalay adiga u baahan taageero. Ma jiraan su'aalo aad u weyn ama aad u yar. Qaybtu waxay ku shaqeysaa qaab sir-xejin ah, gargaarkuna waa lacag la'aan. Waxaad noqon kartaa qof qarsoon haddii aad rabto.

**Taleefan:** 031-367 96 14
Reeb fariin ku saabsan waxa aad ka welwelsan tahay, waxaana lagu soo wici doonaa ugu dambayn maalinta shaqada ee xigta.

**Stella**
Halkaan waxaad ka heli kartaa taageero marka ilmahaaga la dhigo meel ka baxsan gurigooda. Stella waxay u shaqeysaa adiga ka waalid ahaan, waxaana ka shaqeysaa waxyaabaha la xiriira meeleynta ubadkaaga. Tusaale ahaan, waxaan taageero kuu noqon karnaa la kulanka xafiiska adeegga bulshada ama waxaan kaa caawin karnaa inaad baarto baaritaannada iyo dukumeentiyada aasaas u ah meelaynta ilmahaaga. Waxaad sidoo kale ka hadli kartaa sida caafimaadkaaga iyo sida aad dareemeyso. Haddii qofna ka jawaabi waayo, farriin ayaad u dhaafi kartaa waana lagu soo wici doonaa.

**Taleefan:** 031-366 21 38 ama 031-366 30 72
**E-mail:** stella@goteborg.se



**La-talinta qoyska**
La-talinta qoysku waxay bixisaa wada-hadal la xariirta lamaanayaasha iyo qoysaska u baahan in laga caawiyo wax ka qabashada dhibaatooyinka xiriirkooda. La-talinta qoysku waa ikhtiyaari adiga ayay kugu xiran tahay inaad go'aansato haddii aad rabto inaad raadsato la-talin. La-taliyayaasha qoyska waxaa saaran waajibaad sir-xejineed mana qoraan wixii lagu wadahadlo. Waxaad noqon kartaa gebi ahaanba qof qarsoon haddii aad rabto.

**Cinwaanka:** Kronhusgatan 2 F
**Taleefan:** 031-367 93 63
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjeradgivningen

**Sharciga qoyska**
Adinka yeeshay caruur, welina aan guursan waa inaad waalidnimadiina caddaysaan. Waxaad taas ku samayn kartaan xafiiska sharciga qoyska. Xafiiska Sharciga Qoyska wuxuu kaloo caawiyaa mas'uuliyiinta ilmaha ama waalidiinta doonaya inay isfuraan inay ku heshiiyaan oo ay heshiis kala saxiixdaan, tusaale ahaan, haynta ilmaha, degaanka iyo xiriirka.

**Cinwaanka:** Goobta Olof Palmes 1
**Taleefan:** 031-367 92 00
**Bogga internetka:** goteborg.se/familjerattsbyran


**Guriga ilmaha ee Barnahus**
Guriga ilmaha ee Barnahus,waxaa wada shaqeeya xoghayaha arrimaha bulshada, booliiska, xeer-ilaalinta, dhakhtarka carruurta iyo cilmu-nafsi yaqaanka carruurta iyo dhallinyarada si la iskeega kaashado marka uu jiro tuhun ah in carruurta loo geystay dil-rabshadeed iyo xadgudub.

**Cinwaanka:** Gårdavägen 1
**Taleefan:** 031-367 93 95
**E-mail:** barnahus@socialcentrum.goteborg.se

**Qaybta taageeridda qoyska**
Qaybta Taageeridda Qoyska waxaa loogu talagalay qoysaska leh carruurta, kurayda iyo dadka qaanqaarka ah ee da'da yar oo ay ku adag tahay is taxallujinta , foojignaanta, fudaydka, barashada, jujuubka ama dabeecadda.

Waxaan bixinnaa, tusaale ahaan, la-talin taleefoon ah, taageero wadahadaleed, muxaadaroyin iyo waxbarashooyin waalid.

**Cinwaanka: Järnbrotts** Prästväg 2 dabaq 4aad, gelidda dhinaca Teknikhuset, Västra Frölunda
**Taleefan:** 070-822 50 96, 073-076 89 11



## Ku socota adiga oo qaraabo la ah qof taageero u baahan

### Hagaha ilmaha naafada ah

Ma waxaad la tahay qaraabo ilmo naafo ah? Markaa waxaad heli kartaa macluumaad ku saabsan dhammaan taakulooyinka la heli karo.

**Cinwaanka:** Ekelundsgatan 1
**Taleefan:** 031-367 98 08
**E-mail:** lotsforbarnochvuxna@funktionsstod.goteborg.se

### Taageerada xigtada

Taageerada xigtada waxaa lagu bixiyaa qaab wadahadalo taageero ah, kulamo kooxeed, kafateeriyaal, muxaadaro, waxbarashooyin iyo hawlo kale. Waxaan danaynaynaa adiga oo leh qaraabo oo sababo jirro, xadgudub, naafo jireed ama maskaxeed awgood u baahan taageero. Haddii aad u baahan tahay taageero kuu gaar ah, waxaad la xiriiri kartaa la-taliyayaasha xigtada. La xidhiidh taageerada qoyska, wixii ka yar 65 jir.

**Taleefan:** 031-365 33 56, 031-365 36 71
**E-mail:** anhorigstod.under65@funktionsstod.goteborg.se

## Taageero ku socota carruurta iyo da'yarta

### Kooxda goobta ee Fältgruppen

Kooxda goobuhu waxay joogaan meelaha ay dhalinyaradu joogaan oo ay kula hadlaan, siiyaan talooyin, taageero iyo abuurista jawi ammaan ah. Xoghayayaasha goobaha waxay booqdaan iskuulada, goobaha xilliyada firaaqada, jidadka iyo fagaarayaasha. Waxaan baxnaa galbihii, fiidadki iyo maalmaha fasaxa.

Haddii aad ka welwelsan tahay qof dhallinyaro ah, waad nala soo xiriiri kartaa. Waxaan sidoo kale ka shaqeynaa la kulanka waalidiinta iyo la shaqeynta xafiiska adeegga bulshada iyo booliiska.

**Taleefan:** 031-365 16 82
**E-mail:** faltgruppen.angered@socialnordost.goteborg.se
**Cinwaanka:** Linjespringarens Väg 15

### 1177 hagaha daryeelka

Bogga 1177 waxaa ku jira wax badan oo aad ka heli kartid adiga ah, ama dhawaan ahaan doona waalid. Ciwaank hoosaadka ilmo iyo uur ayaa waxaad ka akhrisan kartaa dhammaan wixii ku saabsan uurka, dhalmada iyo waalidnimada. Waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad sugan iyo talooyin ku saabsan caafimaadka carruurta, korriimadooda, xuquuqdooda, cudurrada iyo daryeelka.

**DhalinAngered ee loo yaqaan UngAngered**

Ma dareemaysaa welwel in dhalinyartaadu ay galeen xaalado daroogo ama dembiyo ah. Miyuu iskuulkii ka baxay mise dhibaato kale ayaa haysata oo nolol maalmeedkiisa ka dhigaysa mid adag? Kadib waxaad u jeesan kartaa DhalinAngered ee loo yaqaan UngAngered, oo ah waxqabad loogu talagalay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 10 ilaa 25 sano. Waxaan la kaashanaa waxqabadyo kala duwan si aan si wadajir ah ugu helno dhalinyarada taageero sax ah oo waari karta mustaqbalka fog. Qayb ka mid ah dadaalladeena, waxaad u baahan tahay inaad kaalmo ka codsato xafiiska adeegga bulshada. Haddii aadan halkaas xidhiidhin la laheen, waxaanu kaa caawin karnaa inaad codsato.

**E-mail:** ungangered@socialnordost.goteborg.se
**Taleefan lambar:** 031-365 21 62 eller 031-365 12 60

**Caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada**

Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 17 sano ee qaba xanuun maskaxeed fudud ama dhexdhexaad ah waxay caawinaad ka raadsan karaan xarumaha caafimaadka ee waajibaadka  dheeriga haaya. Tani waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, dhibaatooyinka hurdada, welwelka, walbahaarka, niyad-jabka ama dhibaatooyinka la xiriira kadeedka. Xarunta caafimaadka oo leh waajibaad dheeraad ah, waxaa jira kooxo bixiya la-talin, qiimeyn iyo daaweyn iyo sidoo kale taageerada waalidka iyo wadahadalka qoyska. Xarunta caafimaadku waxay kaloo kaa caawin kartaa in xanuunadaada u gudbiso dhaqaatiirta ku shaqada leh. Waqooyi-bari Göteborg, Tixgelin Kviberg ee loo yaqaan Omtanken Kviberg waxay leedahay waajibaad dheeraad ah oo lagugu caawinaayo, laakiin waxaad codsan kartaa dhammaan rugaha caafimaadka ee magaalada ama gobolka.

**Tixgelin Kviberg ee loo yaqaan Omtanken Kviberg**
**Cinwaan:** Anna Branzells gata 30
**Taleefan:** 031-380 48 44

**Rugta cilmi-nafsiga ee carruurta-iyo dhalinyarada ee loo yaqaan BUP**
Rugta BUP ee Gamlestaden waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 jir ee leh calaamadaha maskaxda sida walaaca, niyad-jabka, dabeecadaha xad-dhaafka ah, dhibaatooyin dhinaca dhexgelidda bulshada, dabeecadaha is qasabka ah iyo cillado dhinaca cunta cunidda . BUP waxay kaloo baartaa kala duwanaanshiyaha falgallada qaarkood, sida ADHD iyo ootiisamka. Si aad taageero uga hesho BUP, waxaad u baahan tahay in lagaasoo gudbiyo daryeelka caafimaadka, daryeelka caafimaadka ee iskuulka ama rugta dhallinyarada. Waxaad sidoo kale ku qori kartaa is-diritaan, foom gaar ah ayaa laguu soo diri doonaa ka dib markaad la xiriirto la-taliyaasha ee BUP.

**Cinwaanka:** Gamlestadsvägen 2-4 dhismaha B2
**Taleefan:** 031-342 02 01
**Lambarka xidhiidhinta:** 031-342 10 00

**Qaabilaadda degdegga ah ee BUP**
Markii ay jiraan xaalado maskaxeed oo degdeg ah oo carruurta ah, la xariir qaabilaadda degdegga ah ee BUP ee isbitaalka Sahlgrenska Östra Sjukhuset magaalada Göteborg.
**Cinwaan:** Vitaminvägen 17
**Taleefan:** 031-343 55 44

**Mini-Maria**
Mini-Maria waa rugta Göteborg ee loogu talagalay dhalinyarada leh arrimaha la xiriira khamriga iyo maandooriyaha,waxaana loogu talagalay dhalinyarada iyo kuwa qaangaaray ee da'yarta ah oo ilaa 21 sano jir ah iyo qaraabadooda. Mini-Maria, adiga waalid ahaan ama qaraabo ahaan waxaad ka heli kartaan talooyina iyo taageero. Waxaad imaan kartaa Mini-Maria laftaadu ama adiga iyo ilmahaaga. Waxqabadku waxa kale oo si toos ah ku wajahan yahay dhalinyarada la kulma welwelka la xidhiidha khamriga iyo maandooriyaha. Mini-Maria waxaa ka shaqeeya aqoonyahan arrimaha bulshada, kalkaaliyayaal, cilmi-nafsi yaqaanno iyo dhakhaatiir. Dhammaan booqashooyinka Mini-Maria waa bilaash. Mini-Maria Göteborg waa iskaashi ka dhexeeya magaalada Göteborg iyo isbitaalka jaamacadda ee Sahlgrenska.

**Taleefan:** 031-367 92 90
**Cinwaanka:** Gamlestadsvägen 4
**Bogga internetka:** minimaria.se

**Rugta dhalinyarada**
Rugta dhalinyarada ee Angered waxay diyaar u tahay dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 13 iyo 24 sano jir. Halkan, dhallinyaradu waxay ka hadli karaan wax kasta oo ka bilaabma jacaylka iyo dhacdooyinka adag ilaa galmada iyo fikradaha ku saabsan nolosha waxayna sameeyaan baaritaan uurnimo iyo wax kaloo badan. Dhallinyaradaadu waxay heli karaan daawaynta caafimaadka iyo maskaxda iyo sidoo kale taageero iyo macluumaad. Rugta caafimaadka waxaa ka shaqeeya umuliso, kalkaaliso, lataliye, cilmi-nafsi yaqaan iyo dhaqtar guud. Rugta caafimaadka dhallinyaradu waa shahaado LGBTQ.

**Cinwaanka:** Angereds torg 5B
**Taleefan:** 010-435 81 50
**Bogga internetka:** goteborg.se/um
Kuwo kale oo aad raadsan kartid

## Xafiiska sooshiyaalka

Xafiiska sooshiyaalka ee degmadaada, waxaad ka heli kartaa talo iyo taageero si aad ugu noolaato nolol ammaan ah oo madaxbannaan. Waxaan bixinnaa taageero iyo gabbaad marka loo baahdo. Waalid aha-an, waxaad codsan kartaa taa-geerada waalidka, la-talin iyo taageerada ilmahaaga. Xafiiska adeegga bulshadu waxa kale oo uu xil ka saaran yahay ilaa-linta iyo taageeridda carruurta iyo dhallinyarada khatarta ugu jira waxyeellada xun iyo baad-hista warbixinnada hay'adaha kale iyo shakhsiyaadka.

Si aad caawimo u hesho: wac xarunta xidhiidhka oo sharrax waxa aad u baahan tahay in lagaa caawiyo, waxaana lagugu hagaajin doonaa qaybta saxda ah.

**Taleefan:** 031-365 00 00
**Cinwaanka:** Hjällbo Lillgata 1

## Caawin degdeg ah

Ma u baahantahay caawimo fiidkii, habeenadi iyo maalmaha fasaxa ah - la xidhiidh adeegga degdegga ah ee bulshada.

**Taleefan:** 031-365 87 00
**Cinwaanka:** Stora badhusgatan 14

**Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama khatar ku ah nolosha: Wac booliiska 112**

Haddii ay dhacdo dhacdooyin ay tahay in booliiska lagu war-galiyo balse aan ahayn xaalad degdeg ah, la xiriir booliiska lambarka 114 14.



**BRIS – Xuquuqda carruurta ee bulshada dhexdeeda**
**Qadka dadka waawayn ee ilmaha:** 077-150 50 50
**Qadka taageerada ee ilmaha:** 116 111
Maalmaha shaqada saacadda 9-12
**Bogga internetka:** bris.se

**Mind**
Halkan waxaad ka heli kartaa caawimo haddii adiga ama qof aad taqaan uu ku fikirayo inuu is-dilo. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku dhageysanno oo aan kula hadalno halka aad nolosha ka joogto. Waxaan rabnaa inaan ku siino taageero, rajo iyo dhiirigelin oo aad ku gaarto rabitaan ah inaad noolaato iyo/ ama raadsato caawimo.

**Taleefan:** 90 101
**Bogga internetka/chatt:** mind.se

**Maskrosbarn**
Ilmaha ubaxa maskros waxaa loogu talagalay adiga oo leh waalid si xad dhaaf ah u cabba khamrada, qaata daroogada, dareemo jirro maskaxeed ama kuu gaysto rabshad maskaxeed ama jireed. Waxay shaqadeena tahay dhalinyarada da'doodu tahay 13 ilaa 19 jir.

**Cinwaanka:** Djurgårdsgatan 38
**Taleefan:** 073-559 15 32
**E-mail:** goteborg@maskrosbarn.org
**Bogga internetka:** maskrosbarn.org

**Bojen**
Bojen waxay shaqadooda tahay carruurta iyo dhallinyarada ay soo mareen xadgudubka qoyska, iyo waalidiintooda oo iyagana la dhibaateeyay.

**Cinwaanka:** Första Långgatan 22
**Taleefan:** 031-15 01 30
**E-mail:** bojen@bojengoteborg.se

**Bona Via**
Carruurta iyo dhalinyarada leh qof weyn oo qoyska ka mid ah oo aad u cabba khamriga ama isticmaala daroogooyinka kale waxay iman karaan Bona Via. Waxaa jira labada kooxo carruur ah, kooxa dhalinyaro ah iyo kooxo waalidiin ah.

**Cinwaanka:** Södra Allégatan 13
**Taleefan:** 031-13 77 02
**E-mail:** info@bonavia.se
**Bogga internetka:** bonavia.se

**Gyllingen**
Gyllingen waxay siisaa taageero carruurta iyo dhalinyarada leh qof qoyskooda ka mid ah oo qaba jirro dhimir ama cudur. Kooxo ilmo yaryar ah oo waalidiin iyo carruur ah. Kooxaha carruurta, dhalinyarada iyo da'yarta qaangaarta ah, taageerada waalidka iyo wada sheekaysi shakhsi ahaaneed.

**Taleefan:** 031-80 89 92

**Waqafka Gyllenkroken**
**Cinwaanka:** Garverigatan 2
**Bogga internetka:** gyllenkroken.se/gyllingen

**Guriga diillimada ama loo yaqaan Randiga Huset**
Guriga diillimada leh wuxuu taageero siiya carruurta iyo qoysaska haysta ama ku lumin doona qof muhiim ah dhimasho.

**Cinwaanka:** Sankt Pauligatan 33A
**Taleefan:** 0774–40 00 05
**E-mail:** info@randigahuset.se
**Bogga internetka:** randigahuset.se

**Solrosen - Göteborgs Räddningsmission**
Gabbaldayahu waxay carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn ku cabbiri karaan erayo waxa ay fikirayaan ayna dareemayaan marka xubin qoyska ka mid ah laga qaado xoriyadda (xabsi, xukun-bannan ku qaadasho, xarig).

**Cinwaanka:** Andra Långgatan 19
**Taleefan:** 031-712 13 10
**E-mail:** solrosen@raddningsmissionen.se
**Bogga internetka:** raddningsmissionen.se/solrosen



## Taageero loogu talo galay adiga ka wayn 18 sano

### Markii ay dhacdo gacan-ka-hadal xigtada dhow dhexdeeda ah

> *Rabshadu waa fal kasta oo lagula kaco qof kale, kaas oo falkaas ku waxyeeleyo, xanuujiyo, cabsiiyo ama sharaf-rida, ku qasbo in qofkaas uu sameeyo wax ka soo horjeeda rabitaankiisa ama inuu ka fogaado inuu sameeyo wax uu rabo".*
> – Per Isdal, Meningen med våld, 2001

Adiga ama ubadkaaga ma la kulmay rabshad, mise adiga laftaadu ma isticmaashay gacan-ka-hadal ama hanjabaad? Waxaad ku heli kartaa taageero iyo kaalmo siyaabo kala duwan. Haddii aad ku nooshahay rabshad si kastaba, waa inaad marka hore la xiriirta xafiiska xafiiska sooshiyaalka ee degmadaada haddii aad rabto talo iyo caawimaad. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa adeegga degdegga ah ee bulshada haddii aad u baahan tahay gargaar degdeg ah marka xafiiska sooshiyaalka xiran yahay.

Hoos ka eeg macluumaadka xiriirka iyo macluumaad dheeraad ah bogga **goteborg.se.** Hoos waxaad sidoo kale ka heleysaa ururo kale oo aad la xiriiri karto si aad u hesho taageero iyo qof aad la hadasho.

**Xafiiska sooshiyaalka ee degmadaada**
**Taleefan:** 031-365 00 00

**Adeegga degdegga ah ee arrimaha bulshada**
**Taleefan:** 031-365 87 00
(waqtiyada xafiiska la joogin)

**Xarunta xaaladda degdegga ee dumarka**
**Taleefan:** 031-367 93 80

**Xarunta xaaladda degdegga ee ragga**
**Taleefan:** 031-367 93 90

**Qadka xasilloonida dumarka**
**Taleefan:** 020-50 50 50
(lagama arkaayo biilka taleefanka, dhowr luuqadood).

**Lex Femme**
**Taleefan:** 020-22 00 55 (43 luuqadood)

**Balwad iyo xadgudub**
Haddii adiga ama qof kale oo weyn oo qoyska ka tirsan ay dhibaato ku qabaan balwadda, waxaa jira gargaar iyo taageero la heli karo. Waxay noqon kartaa wax ku saabsan khamriga, daroogooyinka ama khamaarka lacag, laakiin sidoo kale ku saabsan noocyada kale ee qabatinka. Magaalada Göteborg, waxaa jira meherado badan oo lala xiriiri karo haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay talo iyo taageero. Hoos ka eeg macluumaadka xiriirka iyo wixii macluumaad dheeraad ah boggga **goteborg.se.**

**Kooxda daaweynta Waqooyi-bari ee dhibaatooyinka daroogada:**
Taleefan: 031-367 92 80

**Jawaab celinta talo-bixinta alkoholada**
Taleefan: 031-367 92 47

**Kooxda qabatimada ciyaaridda**
Taleefan: 031-367 92 60



# Caafimaadka-iyo daryeelka bukaanka

**Rugta umulisada**
Rugta umulisada, waxaa lagu siinayaa daryeel inta aad uurka leedahay iyo ka dib, iyo sidoo kale taageero ka hor inta aanad waalid noqon. Waxa kale oo aad heli kartaa talo ku saabsan ka-hortagga uur-qaadidda oo adiga kugu habboon iyo iska baaridda cudurrada lagu kala qaado galmada. Rugta umulisada, wax-aad sidoo kale iska qaadi kartaa tijaaba baaridda unugyada muhiimka ah.

**Rugta umulisada Närhälsan ee Angered**
**Cinwaanka:** Angereds torg 15
**Taleefan:** 031-747 96 50

**Xarunta daryeelka iyo Xarunta daryeelka carruurta**
Halkaan waxaad ka heleysaa macluumaadyada xiriireed ee xarumaha caafimaadka ee agagaarkaaga. Waxaad halkan u aadeysaa haddii adiga ama ilmahaagu u baahataan daryeel caafimaad. Xarumaha caafimaadku waxa kale oo ay leeyihiin xarumaha daryeelka carruurta (BVC). BVC waxay kuu taageertaa waalid ahaan si loo hubiyo in ilmahaagu leeyahay horumar wanaagsan xagga caafimaadka iyo amaan-qabidda. Halkan waxa aad kula kulmi doontaa kalkaalisooyin iyo dhakhaatiir khibrad leh oo aqoon xirfadeed gaar ah u leh caafimaadka carruurta da'doodu tahay 0-6 sano.

**Rugta caafimaadka iyo BVC ee Närhälsan Angered centrum**
**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Taleefan:** VC 031-747 96 00
**Taleefan:** BVC 031-747 96 40

**Rugta caafimaadka iyo BVC ee Närhälsan Hjällbo**
**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 89B
**Taleefan:** VC 031-747 83 00
**Taleefan:** BVC 031-747 83 64

**Rugta caafimaadka iyo BVC ee Närhälsan Lövgärdet**
**Cinwaanka:** Vaniljgatan 28
**Taleefan:** 031-747 85 50

**Rugta caafimaadka iyo BVC ee Guriga dhakhtarka Capio**
**Cinwaanka:** Kultivatorgatan 5
**Taleefan:** VC 031-722 11 80
**Taleefan:** BVC 031-722 11 84

**Rugta caafimaadka iyo BVC ee Gårdsten**
**Adress:** Muskotgatan 10
**Taleefan:** 031-396 00 60

**Isbitaalka Närsjukhus ee Angered**
Isbitaalka Närsjukhus ee Angered waa isbitaal takhasus leh oo dhawr rugo caafimaad oo kala duwan ku leh Angered iyo Gamlestaden. Hoos waxaad ka heli kartaa qaar ka mid ah rugaha caafimaadka kuwaas oo laga yaabo inay kuu fiicanyhiin adiga iyo qoyskaaga inaad ogaataan. Haddii aad rabto in aad wax badan ka ogaato rugaha caafimaadka ee

jira, waxaad booqan kartaa bogga **angeredsnarsjukhus.se**.

### Xaruunta takhasuska ee carruurta iyo dhalinyarada

Xarunta Takhasuska leh ee Carruurta iyo Dhallinyarada waxaa loogu talagalay da'aha u dhaxeeya 0 ilaa 18 sano. Labada rugoodba waxay daaweeyaan carruurta iyo dhallinyarada tusaale ahaan leh: neefta, xasaasiyadda, buurnaanta, sonkorowga iyo calaamadaha xanuunka dhimirka. Carruurta iyo dhalinyarada miisaankoodu hooseeyo iyo carruurta yaryar ee leh dhibaatooyinka cunto ayaa sidoo kale lagu daaweeyaa halkan. Rugaha caafimaadku waxay sameeyaan qiimaynta carruurta waxayna daaweeyaan cudurrada daba dheeraada. Rugaha caafimaadku waxa kale oo ay ka shaqeeyaan qiimaynta maskaxda ee ilmaha si qotodheer.

**Angered**
**Taleefan:** 031-332 69 01
**Cinwaanka:** Halmtorget 1
**Maxaadada:** Angereds centrum
**Bogga internetka:**
angeredsnarsjukhus.se/sbua

**Gamlestaden**
**Taleefan:** 031-345 08 80
**Cinwaanka:** Byfogdegatan 3D
**Maxaadada:** Gamlestads torg
**Bogga internetka:**
angeredsnarsjukhus.se/sbug

### Rugta Vulva

Rugta Vulva waxay qaabishaa bukaanada qaba dhibaatooyinka uu keeno gudniinka gabdhaha. Waxay noqon kartaa wax ku saabsan la-talin, wada hadal taageero ah iyo daawaynta jirrooyinka jireed ee ka dhashay gudniinka.

**Cinwaanka:** Halmtorget 1
**Taleefan:** 031-332 69 02

### Rugta caado-nololeedka

Rugta caado-nololeedku waxa uu talo iyo taageero wadahadal siiyaa dadka waaweyn laga bilaabo kuwa da'doodu tahay 18 jir ee raba in ay beddelaan qaab nololeedkooda ama raba taageero ay ku ilaashadaan qaab nololeedkooda caafimaadka qaba. Waxay noqon kartaa wax ku saabsan cunto wanaagsan, dhaqdhaqaaq badan, joojinta sigaarka ama cabbitaanka khamro ka yar intii uu horay u cabbi jiray.

**Cinwaanka:** Angereds torg 5b
**Taleefan:** 031-332 68 66
**E-mail:** ans.levnadsmottagningen@vgregion.se

### Rugta caruurta qaxootiga

Haddii aad ka yar tahay 18 jir oo aad leedahay astaamo jireed iyo maskaxeed oo laga yaabo inay la xiriiraan socdaalka iyo sharciga qaxootinimada, waxaad la imaan kartaa rugta carruurta qaxootiga. Qoyska caruurta leh iyo carruurta aan lala socon labadaba waa la soo dhaweynayaa. Dhakhtarkaaga rugta caafimaadka ama dhakhtar kale ayaa warqad u soo qoraya rugta caafimaadka, laakiin waxaad sidoo kale ku qori kartaa codsigaaga daryeeleed bogga internetka.

**Taleefan:** 070-020 60 26
**Cinwaanka:** Byfogdegatan 3D
**Maxaadada:** Gamlestads torg

**Rugta-FaR – taageero dhinaca dhaqdhaqaaqidda**

Kaalmo u hel sidii aad u bilaabi lahayd oo aad ugu dhaqdhaqaaqi lahayd - guriga, iskuulka ama dhaqdhaqaaqyo kale. Adiga waalid ahaan waxaad heli kartaa tilmaamo ku saabsan sida loo abuuro nololmaalmeed firfircoon. Waalidiintu waxay dooranayaan in carruurta da'dooda u dhaxeyso 0 ilaa 12 sano ay tahay inay ka qaybgalaan wadahadalada iyo in kale. Kaalmada dhakhtarka jimicsiga waa lacag la'aan waxaana la bixiyaa ilaa 6 bilood. Laga bilaabo da'da lix jir, FaR ayaa loo baahan yahay, warqad dhaqtareed oo dhaqdhaqaaqa jireed ah. Carruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 5 sano, looma baahna warqad dhakhtar si ay u tagaan rugta caafimaadka FaR. Daryeel-bixiyayaashu waxay u qori karaan dhaqdhaqaaqa jirka carruurta iyo dhalinyarada laga bilaabo da'da 6 jir ee u dhaqdhaqaaqa si aan ku filneyn oo halis ugu jira ama qaba caafimaad xumo taasoo lagu hagaajin karo jimicsi badan. La xidhiidh kalkaalisada iskuulka/daryeel bixiye kale.

**Bogga internetka:** vgregion.se/ fargoteborg
**Taleefan:** 031-346 06 40
**Cinwaanka:** Angered Arena, Högaffelsgatan 15

**Talo-ka-qaadashho cunto-yaqaan**

Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 19 sano ee miisaankoodu sarreeyo (ma aha cayilka) waxaa jira fursad ay kula kulmaan cunto-yaqaan si ay uga hadlaan caadooyinka cunto, koox ahaan iyo shakhsi ahaanba. Haddii ilmuhu ka yar yahay 9 sano, isaga ama iyada uma baahna inay ka soo qaybgalaan kulanka. Haddii qofka dhallinyarada ah uu guriga ku nool yahay, way fiican tahay haddii mas'uulka waalidka ah uu qayb ka yahay kulanka. Wadahadalku waa bilaash.

**Bogga internetka:** vgregion.se/ fargoteborg
**Taleefan:** 031-346 06 40

**Cinwaanka:** Rugta Baxnaaninta ee Närhälsan Angered, Triörgatan 2

**Daryeelka ilkaha**

Daryeelka ilkaga, adiga iyo ilmahaagaba way idiin daaweyneysaa. Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 24 sano, daaweyntooda waa bilaash. Waxaan rabnaa inaan siino carruurta, dhalinyarada iyo waalidiinta aqoonta ku saabsan sida loo ilaaliyo caafimaadka ilkaha inta ay nool yihiin oo dhan. Kuwa caadaystay nolosha horaanteeda inay wanaajiyaan ilkahooda waxay leeyihiin fursadaha ugu badan ee caafimaadka ilkaha oo wanaagsanaada. Waxaan ugu yeernaa carruurta iyo dhalinyarada si joogto ah baaritaanno, waxaana siinnaa talooyin ku saabsan sida u ilaalin lahaayeen caafimaadka ilkaha. Sharci ahaan, dhammaan carruurta Iswiidhan waxay xaq u leeyihiin daryeelka ilkaha.

**Daryeelka ilkaha ee Angered**
**Cinwaanka:** Triörgatan 2
**Taleefan:** 010-441 74 50

**Daryeelka ilkaha ee Hjällbo**
**Cinwaanka:** Bergsgårdsgärdet 91
**Taleefan:** 010-441 81 20 Lambarrada muhiimka ah

# Lambarrada muhiimka ah

## Hagaha daryeelka ee 1177

1177 waxaad wici kartaa saacad walba si aad ula hadasho kalkaaliso caafimaad oo aad u hesho talo ku saabsan daryeelka caafimaadka. Hagaha daryeelku waxa kale oo uu ku siin karaa talo iyo macluumaad ku saabsan xeerarka iyo xuquuqaha. Waxa kale oo aad heli kartaa caawimo lagugu hago xarunta daryeelka saxda ah ee aad u baahantahay, xarunta caafimaadka iyo isbitaalada iwm.

**Taleefan:** 1177
**Bogga internetka:** 1177.se

## Lambarka degdegga ah ee 112

Waa in kaliya loo isticmaalo xaalad degdeg ah marka ay jirto oo khatar ku ah nafta, hanti ama deegaanka ah. Xaalad degdeg ah waa marka aad si degdeg ah ugu baahan tahay gargaar ambalaas, adeegga badbaadada, booliiska, rakaab diyaaradeed, gaadiid badeed, kasoo badbaadada buuraha, wadaad wicid ama macluumaad la xariira sun.

## Wax ma tabaysaa ama ma qabtaa fikarro ama suaalo – waxaan doonanaa inaad nala soo xiriirtid!

socialnordost@socialnordost.goteborg.se

## Wixii hawlo firfircooni markaa jira iyo munaasabado ka eeg

kalendarium.goteborg.se

Göteborgs Stad 220202-002-163 Foto: Lo Birgersson, Frida Winter Tryck: September 2022